# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal-qoraalka iyo Gudiyadda

### Kal-fadhgii 28aad Fadhigii 2aad

### Isniin 09/08/2015

**Fadhigu Wuxuu furmey 10:21 Am**

**Gudoomiyaha:-** C/raxman Maxamed C/laahi (Cirro)

**Quraan:- Xildibaan Xaamud**

**Ajendaha:-** Hadal-qoraalka Dooda Ajandaha Kal-fadhiga 28aad

**Gudoomiyaha:-** ilaahey ha inagu anfao aayadaha quraanka kariimka ah, kal-fadhigu wuxu furmay shaley, waxaa la qeybiyay ajandaha, waxaa mudanayaasha ka qeyb-galaya dooda ajandaha inay is qoraan, xogheyntana waxaa ka codsanayaa inay Waraaqihii siiyaan mudanayaasha.

**Md. Axmed M. Diriye (Nacnac):-** Gudoomiye Gobolada galbeedka waxaa ka dhacey abaaro, markaa waxaan.

**Gudoomiyaha:-** Ajandaha horta la galayaa wax ajandaha ka horeyaa ma jiraan mudane waynu ka hadleynaa insha'alaah arrintaas.

1. **Md. Axmed Ducaale Bulaale:-** ***(2min 47sec)*** horta ajendahan kuwii ugu dambeeyay waa kii ugu wanaagsanaa oo waxaa ku jira qodob xog-ogaal noqoshada xaalada dalka waayo Golahani waa Gole siyaasadeed, siyaasda dalkana waa laga milicsadaa Golahan markaa qodobkaa waan xoojinayaa xaaladuna waa inay noqotaa xaalada siyaasadeed tan maamul, tan dhaqaale iyo tan nololeed oo saddexdaa ku soo koobnaa.

   Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in qodobada qaarkood la soo hor mariyo sida Xeerka Wadooyinka (Somaliland Road Authority)ga xaga hore ha la keeno, waayo hay'addaasi Xeer cusub baa loo soo sameeyay oo waxaa laga dhigay Hay'ad madax banaan oo Wasaarada Hawlaha hoos tagta ayay noqoneysaa.

   Waxa kale oo aan xaga hore ha la keeno odhanayaa Wax ka badalka iyo Kaabista Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada anaguna warbixinta ayaanu ku soo dareynaa, waxa kale aan soojeedinayaa in xaga hore la keeno Xeerka Miisaaniyada oo mudnaanta la siiyaa Xeerkaasna.

2. **Md. Saleebaan Cawad Cali(Bukhaari):-** ***(2min 20sec)*** Anigu afar qodob ayaan mulaaxadeynayaa, waxaan ugu horeysiinayaa oo u soo kala hor marinayaa sidan:**-**

   - **Warbixinta Shir-gudoonka, Gudidda Joogtada iyo Gudiyada kale:-** waxaana soo jeedinayaa oo codsanayaa in Shir-gudoonku iyagoo isku duuban maqifkooda ay ka qabaan Golaha inuu yahey Gole sharci ku fadhiya oo korodhsiimadiisu sharci aheyd iyo Gole sharci-daro ku fadhiya mawqifka ay ka qabaan warbixinta ay ku daraan oo Golaha ugu horeysiiyaan Warbixintoodaas.

   - **Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Dootashada Golaha Wakiilada:-** aad baan u xoojinayaa inuu noqdo waxa ugu horeeya ee laga hadlo meelna isla dhigno si doorashooyinku wakhtigii umadu dooneysay inaga in badan la inaga maqley ugu qabsoonto.

   - **Wax ka badalka Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada:-** waxaan aad uga deyrinayaa oo aan leeyahey ajende walba wuu ku jiraa eediisana aan saarayaa Shir-gudoonkoonka iyo Gudidda Joogtada, shantii (5) sano ee ina dhaafeyba ajende walba wuu soo galayey meelna lama dhigeyn, markaa koley haduu soo galeyn oo laga doodeyn oo Xeer-hoosaad Goluhu leeyahey oo la yaqaano waxbana qabana aanu jirin waxaan soo jeedin lahaa in la iska daayo maalin walba ku soo daristiisa muran buu keenayaaye hadaan marnaba toos guda galeyn.

   - **Xeerka Caasimada:-** Xeerkaa Golaha waa la keenay, waa laga doodey, waa loo codeeyay, waxay noqotey in Xeerkaa ay wax badan ka horeeyaan ay ka mid tahey Xeerka kala-xadeynta Gobolada iyo Degmooyinka dalka marka la kala xadeeyo ee tiro koob la sameeyo ee la ogaado Caasimadi maxay noqoneysaa oo Diiwaangalintuna dhamaaanto, arrntaana in badan waa la sheegay ma garanayo waxa laga doonayo ee loo riixayee Xeerkaa Wakhtigiisii ma dhowee ha lala sugo, waliba Goleweynaha lagu qorey Goleweynaha waxaa lagu qoraa wixii cod gaadh**ey** ee la doonayo in loo codeeyo.

3. **Md. Maxamed Saalax Cige:-** ***(5min)*** Runtii Ajendaha kal-fahdigan 28[aad] waa ajende aad u fiican, waana wixii ka soo hadhey kal-fadhiyadii hore iyo xeerarkii inaga baaqdey, markaa wuxuu u baahan yahay in qeybo ka mid dib loo eego, Xeerarkuna laba ayay noqonayaan oo waxna waa kuwo Golweyneha maraya oo soo dhamaadey una baahan in Goleweynuhu ansixiyo, waxna waa Xeerar bilow ah oo aan wali gudiyadii iyo Golaha ka soo dhamaan.

   **Markaa anigu waxaan soo jeedinayaa:-**

   - in shanta (5) ee ajendahan ku jira ee Goleweynaha horyaala iyagu ansixin ayay u baahan yihiin iyo wakhtigii la ansixin lahaa, marka inta hore waa in maalinba Xeer la ansixiyaa

iyadoo ay ku xidhan tahey sida shir-gudoonka iyo cidey khuseysaa ay u soo saaraan, markaa Xeerarkaa ha loogu soo horeysiiyo taasi waa qodob.

- Intii Goluhu Fasax ku jirey waxaa jirta waxyaabo badan oo soo kordhay oo u baahan in Xeerar dib loogu noqdo, Xeerarkii aynu halkan ka ansixiney qaar badan baa u baahan in dib loogu noqdo oo markii hore ku wakhtiyeysnaa in wakhti xadidan ka dib Goluhu dib u eego, waxaa ka mid ah **Xeerkii Takaaliifta Wadooyinka** oo sanadkii dib loo eegi lahaa uu dhamaadey, markaa waxaan soo jeedinayaa in Xeerkasi uu noqdo qodobka ugu horeeya laga dhigo.

- **Xeerkii Takaaliifta Madaarada,** Xeerkaasi oo halkan aynu ka ansixiney marka aad tagto Madaarka oo gasho lacag baa la isweydiiya aan ku jirin Xeerkaa sidoo kale Miisaaniyadii aynu hore u ansixineyna kuma jirto, dariiq sharci oo ay ku soo gasheyna ma jirto, marka iyana ajendaha lagu soo daro ayaan soo jeedinayaa**. (Seconded By C/qadir Jirde)**

- **Wax ka badalka Xeerka Doorashooyinka Golaha Wakiilada**, sida Mudanaha iga horeeyay uu sheegay maadaama Golahan lagu eedeeyo iney xeerkaas dib u dhigaan waa isna uu ka mid noqdaa kuwa ugu horeeya.

- **Wax ka badalka Xeerka Ciqaabta Guud,** Xeerkaasi waa Xeer bulshada saameya aadna ugu baahan yihiin in wax laga badalo, wakhti hore oo Dawladii Siyaad Bare la sameeya intii ka dambeysay ilaa iminkana lagu dhaqmo, markaa isna Waxaan ku soo dari lahaa Ajendh **. (Seconded By C/qadir Jirde).**

4. **Md. C/qaadir Jaamac Xaamud:-** ***(1min 52sec)*** Shir-gudoonka iyo Goleweynahaba waan salaamayaa, runtii Ajenduhu waa mid fiican laakiin in siduu u kala muhiimsan yahey (priority) loo sameeyo waa muhiim, waxaan ka hadlayaa:-

- **Wax ka badalka Xeerka Doorashooyinka,** Xeerkaasi waa muhiim waana loo baahan yahay laakiin waxbaa ka horeeya ah in lagu saleeyo saami qeybsigii iyo sidii kuraasta loo qeybin lahaa, markaa Xeerkaasi wuxuu u baahan yahay in Gudi loo saaro oo aan soo jeedinayaa.
- **Xeerka Waxbarashada** isna ha la soo hor mariyo waa Xeer muhiima oo loo baahan yahay.
- **Xeerka Wadooyinka (Somaliland Road Authority bill),** Xeerkaasina waa muhiim oo
- **Muda Xileedka dhamaadey,** hada waxaa dhamaadey muda xileed sidey ahaan jirtey Golihii hore marka mud xileed dhamaado xubinta ugu da'daweyn baa intey hogaamiso la dooran jirey shir-gudoon sida sharciga ku qornaan jirtey shir-gudoonka marka joogeyna haduu tartamayo CVgiisa intuu dhiibto ayuu Golaha caadi u soo fariisan jirey, waana wax

sharciya oo Xeer dhigayo maaha in shir-gudoonku uu iska soo fadhiisto, marka intaas ayaan ku soo koobayaa, waad mahadsantihiin.

5. **Md. C/raxman Cismaan Caalin:-** ***(3min 28sec)*** Ajendaha ina horyaal intii ajende ina soo marey ee aan arkey waa kii ugu liitey waligey maan arag mid la mid ah, kal-fadhi kasta waan naxaa markaan saddex xeer ku arko Xeer-hoosaadka Golaha, Xeerka Ganacsiga Baananka iyo Xeerka Caasimada, waxaxynu caadeysaney inaynu joogto ka dhigno Xeerar magacooda aynu ku soo darno meesha laakiin aynaan u gudbin inaynu wax ka qabano, waana dhaqan xumo, waxaa maanta ku soo biirey Xeerkan ugu horeeya ee Wax ka badalka Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada oo siyaasad ahaan loogu soo darey.

   Xeerarku saddex siyaabood baa ajendaha loogu soo daraa, inay Xukuumada ka yimaadaan Xeerarku oo marka gudi loo soo gudbiyaa inta ajendaha lagu soo daro, tan labaad waa in Mooshin lagu keeno Golaha iyo tan saddexaad oo ah inaynu inagu curino, markaa wax ka badalkan Xeerka Doorashadu saddexdaa mid kuma imane side ayaa ajendaha loogu soo darey oo ku soo galey, anigoo raacsan in la galo oo waliba loogu soo horeysiiyo hadana waa inaynu xaqiijinaa sharciyada uu ku soo galey ajendaha Xeerkani, ma shir-gudoonka iska soo gashadey, waliba waxaad ku sii darteen inuu Goleweynaha yaalo, Golahana looma qeybin oo ma arag, markaa waa in sharciyada uu ku soo galey la cadeeyo.

   Waxaan Ajendaha ugu soo horeysiinayaa Xeerkii Nidaamka Xukuumada, Xeerkaa waynu ka doodney, waynu gabo-gabeynay waxaa la sugayay inay Xogheyntu isku soo gurto oo aynu dhameystirno. Aynu iska deyno dabeecadan khaldan ee in xeerar uun ajendaha lagu soo guro oo 10 kal-fadhi uun iskaga jiraa, horena waxaynu u qaadaney in ajendihii dhamaadey Xeerarkii ka baaqdey ee ka hadhey lagu soo daro Kal-fadhiga cusub ee xiga, hadeynu iskaga soo gurno oo siyaasad ahaana u muujino ma soconayaan adeer.

   Xeerka Miisaaniyada isna waa lagu soo darey golaha ma la keenay haduu yaalo ha loogu soo horeysiiyo angi in la keenay iyo in kale ma ogiye hadii kale ha laga saaro ileyn sabab loogu soo daraa ma jritee, waxa weeye caqliyadii aynu ku noqono oo Xeer-hoosaad aynu ku shaqeyno ee maaha inaynu ku shaqeyno waxaynu jeebkeena kala soo baxney, iminka shaley Goluhu wuu furmay kooramkiina ma buuxin, maantaa ma buuxo, markaa waxaan odhan lahaa aynu u soo noqono sharcigii iyo sdii shaqadu aheyd.

   **Ajandahana waxaan soo jeedinayaa inaynu ugu horeysiino:-**

   - Xeerka Nidaamaa Xukuumada ee kan labaad ah iminka.
   - Xeerka Ganacsiga Baananka aynu ku xejino,
   - Wax ka badalk Xeer-hoosadkana aynu ku xejino saddexdaa Xeer ee waligood ku jirey aynu ixtiraamno oo ugu horeysiino, waan ka baxay anigu.

6. **Md. Xuseen Maxamed Cige:-** ***(3min 58sec)*** waxa ina horyaal ee aynu ka hadleynaa waa ajandahan sidii aynu u kala horeysiin laheyn wixii ku dhaqmeyno kal-fadhigan ajandihiisan**, waxaan u kala horeysiin lahaa ajendaha anigu sidan:-**

   - **Wax ka badalka Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada,** Xeerkan ugu horeeya ee doorashadu inuu mar hore dhamaado ayay aheyd, waayo doorasho ayaynu dooneynaa Xeerkiina ma jiro dee suurtagal maaha, Xeerkasai wuu habsaamey, waa la inagu canaantey, marka deg-deg aynu u dhameyno.
   - **Xeerka Ganacsiga Baananka,** Xukuumad baynu nahey, aduunyada ayaynu xidhiidh la leenahay hadey tahey Baananka tahey, waynu u baahanahey Xeerkaas suurgalna maaha oo la inaga yeeli maayo Xeerkaa ma lihin xaga xidhiidhka caalamka, waxaa la sheegay oo dadka qaar ku tilmaameen inuu xaaraan yahey, dee ninka aan xaaraan rabin yaanu doonan, ninka leh waa xaaraana anigu garan maayo, markaa Xeerka kan labaad ha laga dhigo.
   - **Xeerka Waxbarashad Qaranka,** xeerkaasina waa Xeer muhiima isna kan saddexaad baan ka dhigi lahaa.
   - **Xeerka Nidaamka Xukuumada,** wuuu mudan yahey in loogu soo horeysiiyo hadii kan afraad laga dhigona ma fog, waxayna iigu muuqataa anigay kuwan kale la mid yihiin xaga muhiimada, xeerarka kale sidey u kala horeeyaan baan u deyn lahaa.

   Waxaan ka saari lahaa hadii raali laga yahay:-

   - **Xeerkaa Kufsiga iyo Xadgudubyada Jinsiga,** waayo kufsi ma naqaanee idinku ha inoo furina.
   - **Xeerka la-dagaalanka Argagaxisada,** isna baahi uma qabnee inaga saara.

   **Bixitaan Gudoomiyaha:-** Gudoomiyaha Md. C/raxman Cirro ayaa fadhiga ka baxay waxaana fadhiga sii gudoominaya Gudoomiye ku-xigeenka 1aad Md. Baashe Maxamed Faarax.

7. **Md. Siciid Maxamed Cilmi:-** (9min 10sec) Shir-gudoonka Dhamaan, Mudanayaasha, Shaqaalaha iyo Saxaafada si weyn baan idiin wada salaamayaa, anigu saddex madax baan u kala saarayaa soo jeedinteyda, mid waa qaabka guud ee aynu dooda oo hada wax ii muuqdeen, midna waa kala horeysiin aan kala horeysiinayo qodobada ku qoran Ajandaha, mid kalena waa soo jeedin cusub oo aan soo jeedinayo in lagu daro.

   Qaabka guud 10 xiligii golahani waa gabaabsi oo 10 sano ayaynu soo fadhiney waxaad moodaa intaas oo dhan inaan waxba inoo kordhin oo sidii aynu barigii hore u doodi jirney oo cilidihii barigii hore ay wali ina heystaan, waa qodobka uu ka hadlayay iminka C/raxman Dheere ee ah wixii xeerarkii oo badan baa la iskaga soo qorayaa ajandihii la eegi maayo maxaa mudadaa la qaban karaa, maxaa meesha yaala oo aynu heynaa ilaa maalintii aynu nimi ilaa maanta sidaas ayay isu dhexyaaliin, Marka waxaan soo jeedinayaa shir-gudoonku markuu soo sameynayo

ajandaha waa inaad isla eegtaan wakhtiga aynu heysano iyo imisa waxbaa la galin karaa ajandaha.

Sida loo kala horeysiinayo, anigu sida loo kala horeysiinayo ee ku saleysan maxaynu qaban karnaa wakhtigaa oo aan soo jeedinayaa in labada Gole ee Xukuumada iyo Wakiilada midna ma fadhiyo wixii uu ku shaqeyn lahaa, Golaha Wakiilada waxaa laalaada Xeer-hoosaadkii, Xukuumadana waa tan qodob ahaan ugu jirta Xeerkii Nidaamka Xukuumadu, markaa waxaan soo jeedinayaa:-

- **Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada iyo Xeerka Nidaamka Xukuumada** oo ah labadii Gole ee dalka dhaqaajinayay labadiiba maadaama aaney jirin nidaam ay ku shaqeeyaan oo xeer labadaa Xeer aynu ugu soo horeysiino.

- **Wax ka badalka Xeerka Doorashada,** Gudoomiyaha waxaan uga mahad celinayaa oo waliba dhowr jeer warbaahinta ka sheegay inuu xeerkaa ugu soo horeysiinayo waliba Goleheena lagu canaanayay markaa waan ugu mahad celinayaa Shir-gudoonka inay ugu soo horeysiiseen Xeerkaa, laakiin waxaa muuqata markii aanu is xansaney Xildhibaanada in loo baahan in isagoo kuusan aanu Golaha iska soo dhexgaline in laba mid la sameeyo oo ah in Gudi guud Golaha looga saaro oo lagu celiyo iyo in Gudiddii Arrimaha Gudaha oo waliba aan taas anigu xoojinayo maadaaama aynu Gudiyo u leenahay hawlaha inu gudidaa lagu celiyo oo ay soo eegto oo aanu noqon mid la inagu soo dhex tuuro. **(Seconded by 3 Mps).**

**Point order:- C/qadir Jirde:-** Xildhibaanku dood buu soo jeedinayaa iyadoo aan qodobkii wali ajandaha lagu ansixin oo cida loo dhiibi lahaa iyo hadii la celin lahaaba horta ajandaha qodobku ha soo galo.

**Md. Siciid M. Climi** (dooda sii watey) xildhibaanku wuu mahadsan yahey,

- **Xeerka Miisaaniyada,** Xeerka inkastoo aan anigu Gudidda dhaqaalaha ayaan ka tirsanahey Xeerka lama socono gudidayadu Xeerka oo isago iska lugeynaya sida kaas doorashada Golaha Wakiilada ayuu iska soo dhexgaley shir-gudoonka dabadeedna way iska soo tureen, laakiin Xeerka Miisaaniyada waa loo baahan yahay si aynu 2016da Miisaaniyada marka aynu ka tageyno meesha iyadoo xeer leh aynu ka tagno, markaa Xeerkaana waan taageersanahey ee Qodobka 3aad ha laga dhigo.

**Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro ajandaha oo aan leeyahey halagu kordhiyo:-**

- **In la furo Dastuurka,** Waxaad ogtihiin mar walba oo doorashooyinku dalka soo galaan oo soo dhowaadaan muran baa yimaada lixaad leh, murankaasina wuxuu inala gala Dastuurka, dastuurkuna inama kala saaree isagaaad moodaa inuu si isugu dhex jiro oo waxaa la odhan karaa dastuurku isagaa qeyb ka ah muranka siyaasadeed ee Golayaasha

iyo asxaabta siyaasadeed ama daneeyayaasha guud ee doorashada, sidaa darteed anigu waxaan soo jeedin lahaa hadii saaxiibey xildhibaanadu mudada inoo hadhey oo waliba fadhigan ka bilowno in Dastuurka wax ka qabano waana waxyaabaha aynu sheegan karno oo ku faani karno markeynu Golaha ka tagno, waayo Xeerarka cid waliba way soo saari kartaa oo furi kartaa.

Laakiin dastuurka oo u baahan wax ka badal iyo kaabis, tusaale ahaan waxyaabaha xasaasiga ah marka ay timaado murkanka siyaasiga waxaa ka mida deegaanka aan ka soo jeedo ee Gobolka Sool, Buuhoodle iyo Sanaag barigeeda iyo koonfurteeda dadka cabanayaa waxay ka cabanayaan maaha wax gaar ah oo dhibaato loo geystey waxay ka soo tafiiran tahey qaabka saami qeybsiga dalka lagu leeyahay, waad ogtihiin xisbiyada Qaranka waxaa Gudoomiyayaal iyo madax ka noqon kara oo kaliya cidii gudaha ku leh cod, codkii Goboladaa oo dhul balaadhan ahi wuu inaga maqan yahay, sababta uu ku maqan yaheyna waa arrin dastuuriya ee ma jirto cid hubeysey/hubeysan, hadii dastuurka la furo oo dib loo eego oo lagu soo daro talo-bixin ku saabsan sida saami-qeybsiga masuuliyadaha qaranka loo sameyn lahaa, markaa jamhuuriyada Somaliland iyadoo mid ah bay doonan lahaayeen ictiraafka aynu maanta ka hadleyno iyo horumarintaba.

**Sidaa darteed, anigu waxaan soo jeedinayaa:-**

- In ajandaha lagu daro in la furo Dastuurka jamhuuriyada Somaliland oo secondmen helay, waan ka baxay waadna mahadsan tihiin.

8. **Md. Ibraahim Caraale Cabdi:-** *(5min 28sec)* Shir-gudoonka sharaf badan, Mudanayaasha iyo Saxaafadaba waan idin salaamayaa, aqalka albaabka ayaa laga soo gala, hadii albaabkiiba xidhan yahay dee aqalka lama soo galo, anigu saaka maan fileyn gudoomiyaha Golaha Md. C/raxman cirro inuu Gudoominayo Golaha waayo wuxuu taagan yahey albaabkii aynu ka soo galeynay, markaa ajandaha ayaan ka hadlayaa aniguye qayli ama qeyliye waxaan soo jeedinayaa in ajandaha lagu soo daro.

- In Goluhu go'aan ka qaataa mawqifka jiritaanka sharci ee Golahan Wakiilada, waana in Goluhu ka doodaa oo go'aan ka qaataa, iminka rag baa ajandaha ku soo darey xog ogogaalshaha dalka marka maxaynu ka xog ogaalnaa dalka Golihiiba la isku heystaa oo ugu darane, qodobkaasina waa inuu noqdaa kan ugu horeeya ajandaha.

- **Wax ka badalka Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada,** Xeerkaasi waa xeerkii lagu inagu soo dooranayay ee la inaga sugayay, dadweynuhu waa inaga sugayaa, waxaana xildhibaan Maxamed Saalax ku raacsanahey in aan Xeerka la siiyaasadeyn oo inaga ha ina dhaafo oo yaan xageena la soo eegin, marka Waxaan soo jeedinayaa inuu noqdo qodobka labaad ee ajandaha.

- **Wax ka badalka Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada,** Xeerkaasi in badan buu ajandaha ku jirey, shir-gudoonku ilaahey ha ka yaabo dib ha u dhigina markastee ilaahey baa kuraasida idiin hayee xeerkaa qodobka saddexaad ha ka dhigo ayaan soo jeedinayaa.

Waxaan ka saarayaa ajandaha:-

- Xeerka Caasimada, Xeerkaa waxaa ka horeeya Xeerka kala-xadeynta Gobolada iyo Degmooyinka dalka, Caasimada reer Hargeysa oo kaliya ma laha ee dadkoo dhan bay ka dhaxaysaa, marka reer Marood-jeex Gobol xad leh loo sameeyo caasimaduna inaga dhaxeyneyso ka horow Xeerkaasi mid Golaha iman kara maaha, waxaana leeyahey Ajandaha laga saaro,

9. **Md. Xaamud Cisman Cigaal:-** *(4min 40sec)* ASC dhamaan Shir-gudoon iyo Mudanaal, waxaan leeyahey ugu horeyn shir-gudoon baa jira oo ina hagaya marka inagu aynu is dhageysano, anigu waxaan ugu horeysiin lahaa AJandaha:-
    - **Wax ka badalka iyo Kaabista Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada,** dhowr xildhibaan way sheegeen oo waan ku raacsanahey sababtoo ah xildhibaanku ma ogaan karo waxa xaq loogu leeyahay iyo wixii kale, markaa waxaan soo jeedinayaa in Xeerkaa loogu soo horeysiiyo.

    - **Wax ka badalka Xeerka Doorashada,** xeerkaas oo ugu soo horeeyayna waxaan ka dhigayaa kan labaad.

    - **Gudidda Culimada,** 2001kii Markii Dastuurka la ansixiyay la ansixiyay Qodobkiisa 120aad waxaa lagu darey oo ku qoran arrin aan la taaban oo ah in la sameeyo Gudidda Culimada Dalka, lama sameyn markaa waa in la sameeyo oo dawlada iyo Golaha Guurtida ayaa keenayee, waxaan doonayaa in la igu taageero mooshin ah in lagu khasbo dawlada inay keento dawladu.

**Waxaan ka saarayaa ajandaha:-**

- **Xeerka Nidaamka Xukuumada,** waxaan doonayaa in Xeerka dib loo dhigo, sababtoo ah waxaa inoo keenay Wasiirka Madaxtooyada, Wasiirku haduu inaga doonayo inaynu ansixino Xeerka waa inuu Golaha ixtiraamaa, maanta waa loo yeedhay oo gudidda joogtada ayaa u yeedhay wuu u iman waayay, marka dib ha loo dhigo ayaan ku talinayaa Xeerkaas.

- **Xeerka Kufsiga iyo Xadguduyada jinsiga,** halkan saddex cisho ka hor waxaa ka socdey laba siminar, mid wuu wanaagsanaa oo xildhibaanadu sidey goboladoodi u tagi lahaayeen buu ahaa, midna wuxuu ahaa kan Xeer kale oo UNDP keentaya oo diinteena iyo dhaqankeena khilaafsan oo ah Xeerkan kufsiga ee halka ku qoran, waa mid diinteena iyo dhaqankeenaba khilaafsan, saddex maalmood horteed baa halkan

laga wada hadlayay side buu halkan u soo galey, 4 page baan ka diyaariyay markaan arkay dhaqan xumada halkan ka socotey.

**Gudoomiyaha, Point of Order:-** Mudane waa ajandihii waxaad sheegeysaa oo kaliya wixii aad ku soo dareyso iyo wixii aad ka saareyso, Xeerkana hore ayaa loo keenay oo waa laga dooday markaa ajandaha u soo noqo.

**Md. Xaamud:-** Waxaan soo jeedinayaa anigu in laga saaro Xeerka Kufsiga AJandaha oo ha la laalo.

10. **Md. Xamze Maxamed Gaadaweyne:-** *(2min 38sec)* Shir-gudoonka tacbaanb ah iyo Gole dhisid laheyn waxay u baahan yihiin Xakameyn iyo sharci, sababta aan ceynkaa u leeyahey waxa weeye had iyo jeer waynu is canaanaa oo waxaynu nidhaahnaa hawlaha ceynkaas ayaa laga habsaamey iyo waa la iman waayay, wixii waxaa laga gudbi lahaa ee wax laga qabanayayna sameynmeyno, waxaan soo jeedinayaa:-

   - **Wax ka badalka Xeer-hoosaadka,** maanta ayaa loogu qaatey oo Xeer-hoosaadkii Goluhu meesha yaalaa, markaa waa ineynu isaga ugu horeysiinaa oo aynaan wax kale horta qaban, hadeynu taas sameyn waxaa inagu soo noqonaya tacbaan nimadii Shir-gudoonka iyo nidaam xumadii, markaa kan kowaad ha noqdo inaynu ansixino Xeer-hoosaadka.

   - **Xeerka Caasimada,** aniga waa ila fool xumo in qolada reer Hargeysa Xeerkan ku hadaaqdo ama ay soo qaad qaado ama u doodo inteena kalena aynu ka aamusno, halkaa waxaa ku jirta qodob yar oo ah in iyana isa siiyeen, qolada kale dibada ka yihiin, waxa weeye War Xeerkani wuu iman doonaa, waana loo baahan yahey laakiin saaxiibayaal wakhtigiisa aynu la sugno wax badan baa ka horeeyee, mid kale in badan baynu ka hadalney oo u naaqishney waxaynu isla garaney xiligiisa ha loo daayo, marka isna sidaa aynu u deyno.

   - **Taageerid (secondment),** Anigu hadalii Mudanayaashu halkan ka yidhahdeen badanaa waan waafaqsanahey gaar ahaan Ibrahim Caraale iyo Siciid M. Cilmi si wayn ayaan u taageersanahey hadaladoodii.

11. **Md. C/raxman Yuusuf Cartan:-** *(3min 27sec)* Shir-gudoonka, Xildhibaanada Golaha Dhamaan waad salaaman tihiin, hadii aad eegto Ajandaha wuu fiican yahey Xeerarka ku qoranina dhamaan waa muhiim, Laakiin maanta halka aynu mareyno ineynu mudnaan kala sameyno, arrimaha maanta yaal ee dooda iyo muranku ka taagan yahey waa arrimaha doorashada iyo arrinta mudo kordhinta, sidaa darteed:-

   - **Wax ka badalka Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada,** Xeerkaasi waa xeer muhiima waana xeer la inaga sugayo hase yeeshee waa inuu habkiisa maro, waa in loo sameeyo

mudo la yidhaahdo waa lagu keenay isagoo habkii iyo procedure-kii soo marey, markaa Xeerkaas waa inuu soo galo ajandaha oo waa muhiim, laakiin waa in Gudidda Arrimaha Gudaha ee ku shuqul leh loo dhiibo oo la yidhaahdo waxaad ku keeneysaa mudadaa cayiman.

- **Xeerk Doorashada Golaha Guurtida,** Xeerkaasi waa muhiim isna maadaama arrimaha mudo kordhinta laga hadlayo, markaa labadaa Xeer ee Doorashooyinka Golaha Wakiilada iyo Golaha Guurtida Ajandaha lagu soo daro oo inta aanu kal-fadhigani dhamaan la ansixiyo ayaan soo jeedinayaa.

- Xeerarka kale waa muhiim midna ha laga saaro odhan maayo, Xeerar badan baa in badan ina horyaaley inta awoodeena ah xeerar waa ineynu ansixinaa, maantana Xeerarka ugu muhiimsan ee la inaga sugayaa Waa kuwa doorashooyinka.

12. **Md. Ibraahim Mahdi Buubaa:-** *(10min 5sec)* Anigu waxaan qabaa inuu yahay ajandihii ugu muhiim sanaa ee golaha lasoo hor dhigay waayo waxaa ku jira xeerar in badan lagu eedaynayay golahan inay ku fadhiyaan oo uu ka mid yahay

- **Wax Badalka yo Kaabista Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada**. Xeerkuna maaha ku meel gaadh ee waa xeer dhaqan gal ah jaran jar baanu maraa intiina wuu maray, waxaa ku jira laba qodob waana laba aad u fudud. waxaan leeyahay oo soo jeedinayaa golaha wakiilada xeerkaasi haduu caqabad ku ahaa doorashadiisa in gudina lagu calin ee afarta maalmood ee u horeeya labada qodob ee xanibaya doorashada xeerkana sidiisa loosii daayo,

- **Xeerka Nidaamka Xukuumada,** Guddida joogtadaa kasoo shaqaysay doodiisii way dhamaatay ansixin buu u baahan yahay waxaan golaha usoo jeedinayaa in xeerkii oo isku furan la horkeeno golaha la horkeeno lana ansixiyo.

- **Xeerka Miisaaniyada Qaran** 24 sanadood jiray baynu nahay aan lahayna xeerkii miisaaniyada sidaynu caalamka wax uga dooni karnaa hadaanu jirin xeer miisaniyadeed waynu ka war haynaa wasaaraduhu siday doonaan bay u maamulaan hanti-dhawrkuna wuu asturaa, waxaasoo dhamina wuxuu ka imanayaa xeer la'aanta, waxaan soo jeedinayaa in ka labaad laga dhigo, waayo waxaa loo baahan yahay inaynu samayno saddex miisaaniyadood miisaaniyada golaha garsoorka, miisaaniyada golaha baarlamaanka iyo miisaaniyada golaha xukuumada xeerkana ay ku cadaato.

- **Xeer-hoosaadka Golaha,** goluhu xeer-hoosaad buu leeyahay ansaxa oo shaqeeya khilaafkii golaha soo dhex galay oo goortidu so jeedin bay sameeyeen taasna wuxuu goluhu isku raacay in soo jeedintaa guurtida sideeda loo dhex galiyo sidaa darteed guddida joogtadu way soo dhamaystirtay qodobo kaabisana way ku dartay waana diyaar golahana waa hor yaalaa waxaan kusoo koobayaa xeerarka soo noqnoqnaya wixii aan

muhiim ahayn waa in laga saaraa oo sida ay u kala muhiimsan yihiin loogu soo daro.

- **Xeerka Doorashad Golaha Guurtida,** waxaynu ka warhaynaa golaha guurtida oo in badan halkaa fadhiyay in loo samayn kari waayay xeer sanadkii 2006 markii golaha wakiiladu soo galay wuxuu sameeyey xeerkii golaha guurtida waxaa soo caliyay golaha guurtidda.

13. **Md. Xasan Cawaale Caynaan:-** (2min 30sec) halkan waxaan ka soo jeedinayaa horta Xeerka Caasimada waxaanu ku keenay Mooshin 10 ajande ayuu ku jirey, waxa hortaagan waa Shir-gudoonka, maantana media ayaan ka sheegayaa oo shir jaraa'id ayaan qabanayaaa in Xeerkaasi Shir-gudoonku hortaagan yahey, waxaan leeyahay:-
    - **Xeerka Caasimadu** waa inuu noqdaa kan koowaad ninka diidanina waa nin Somaliland diidan.
    - **Xeerka Waxbarashada,** Xeerkaasi wuu naga soo dhamaadey, warbxintiisiina waan keenay oo Golaha ayaan u soo gudbiney, markaa waa inuu isna ugu horeeyaa, laga doodaa oo la ansixiyaa waayo aasaaska umada.
    - **Mooshinkii Sixir Bararka,** waxaanu keenay mooshin ka hadlaya Sicir bararka lagumana soo darin, markaa hadaanu keenay Mooshinkaa waa lagu soo daraa ajandaha.
    - **Wax ka badalka Xeerka Doorashada,** Xeerkaasi waa muhiim laakiin waxaa ka soo horeeya Xeerarka aan soo sheegaye ha ka horeeyaan.

14. **Md. Ibraahim Axmed Reygal:-** (2min 29sec) Shir-gudoonka sharfta leh iyo dhamaan Mudanayaashu way salaaman yihiin, Ajandahan ina horyaal waxaan u arkaa ajande wanaagsan oo si fiican looga soo diyaariyey, waxaan soo jeedinayaa in shantaa Xeer ee Goleweynaha inay yaaliin ay ku qoran tahey oo Xeerka Caasimada laga reebo aynu ugu horeysiino, Xeerkaa Caasimadana lala sugo marka la kala xadeeyo Gobolada iyo Degmooyinka, sidaa darteed waa:-

    - In afarta Xeer ee Goleweynaha inay yaaliin ku qoran tahey eek ala ah:
        - Wax ka badalka Xeerka Doorashad Golaha Wakiilada.
        - Xeerka Waxbarashada.
        - Xeerka Nidaamka Xukuumada iyo
        - Xeerka Ganacsiga Baananka .

    **Markaa waxaan soo jeedinayaa:-**

    - In Afarta Xeer aynu ugu horeysiino, ajandahana sidaa ha lagu ansixiyo, waad mahadsantihiin.

15. **Md. C/raxman Maxamed Jaamac (Aw-xoog):-** (6min 42sec) Shir-gudoonka iyo xildhibaanada waan salaamayaa, marka hore maanta dood maaha ee waa ajandaha maxaad ku daraysaa iyo maxaad ka reebaysaa oo kaliya anigu waxaan qabaa ina anay macquul ahayn aan

kalfadhigan kaga hadalno dhamaan xeerasha ajandaha lagu soo qoray, markaa wixii macquula aan ka shaqayno ayaan odhan lahaa.

Sida xaga hore ee ajandaha ku qoran waxaan aad u xoojinayaa in aad loo adkeeyo xog-ogaal u noqoshada dalka sida arimaha dibada iyo hay'adahan wadanka ka baxay.

Waxaan kal-fadhigaan aan ka shaqayn karnaa afar qodob oo kaliya qodobadaasina waxay yihiin:-

- **Wax-kabadedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Golaha Wakiilada**, mudo dheer la inaga sugayay hadii aynu nahay Golaha Baarlamaanka waxaa kale oo aan raacinayaa in lagu daro xeerka Golaha Guurtida.

- **Xeerka Kufsiga iyo Xadgudbayada Jinsiga**, waayo waxaa wadanka ka dhaca xadgudubyo badan oo u baahan in wax laga qabto markaa waxaan leeyahay xeerkan waa mid aad loogu baahan yahay)

- **Xeerka Somaliland Road Auiltority.** (waayo xeerkaasi aad ayuu u raagay waayo waxay ahayd in la keeno mar hore, waxaanan soo jeedinayaa in la keeno.

- **Xeerka Miisaaniyada,** isna waxaan taageersanahey in lagu soo daro.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Afartaa xeer ayaan ka shaqayn karnaa kalfadhigan ama labada bilood ee uu socdo sidaa ayaan soo jeedin lahaa waanad mahadsantihiin..

16. **Md, Maxamed Jamac Cabdi:-** (10min 21sec) Hadii aan si toos ah u abaaro ajandaha sida ku qoran ajandaha qodobkiisa 2aad ee odhanaya Xogogaal u noqoshada Xalada Dalka, mudana kastaa xaq ayuu u leeyahay in uu ogaado xaalada dalku ku sugan yahay waana waajibaad saaran mudana kasta oo la soo doortay waana in laga doodaa.

Hadii aan mashruucyada sharci u imaaado waxaan ugu horeeya Wax-kabadedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Golaha Wakiilada, ugu horay hadii aan woxogaa dib ugu noqdo xeerkan (xeerkan markii la sameeyay ee labada gole ansixiyeen madaxweynihii markaa joogay waxaa uu u gudbiyay Maxkamada dastuuriga ah oo iyana ka soo saartay xukun dastuuriya oo maanta yaala oo xujo ah golahana horyaala.

Labada qodob ee maanta lagu degdegsan yahay ama saami qaybsiga waxay ka soo saartay go'aan ah waxaa la baabiiyay oo meesha laga saaray xeerkii doorasha Golaha wakiilada oo meel baa la dhigay ama waa la laalay, waxaanay sheegtay in lagu galayo doorasha saami qaybsigii axdi qarameedka ku qornaa ama beelo ayaa loo galayaa tii ayaan ku soo galnay kuna fadhinaa.

Xukunkii Maxkamada ee dastuuriga ahaana wali wuu taagan yaha oo maanta nin odhan karayaa doorasha sidii hore ayaan ku galaynaa ma jiro iyada oo aanay Maxkamadii aanay wali waxba ka badalin, sabab ay wax ugu badashaana aanay jirin.

Waxaa iyana xujo ah in la helo nidaam kale oo aan doorashada ku galno in la helo, waxaana muhiim ah laga qayb galiyo kor ilaa hoos bulshada codayn karta, waana xuquuq siyaasiya oo qof walba taabanaysa Gobol walbana taabanaysa.

Sidaa darteed arintaasi doorashada Golaha wakiiladu ka fursan mayso in la furo Dastuurka, waana in xubnaha Golaha Guurtida la yareeyaa Golaha wakiiladana la badiyaa.

Xeerkan Maxkamada ayaa meel dhigtay xeerkana waa xeer siyaasiya oo la soo dhex dhigay Golaha si aanu laab la kac inooga noqon waa in la helaa nidaan lagu galo doorashiiyinka iyo xal wax loo qaybsado.

Waxaanan soo jeedinayaa In xeerkan ajandaha laga saaro waxaa kale oo inoo yaala xukunkii Maxkamada ee waa in laga tashadaa sidii laga yeeli lahaa, ama gudi ha loo saaro

Waxaa kale oo aan qodobada u soo kala horaysiin lahaa

- **Xeer hoosaadka Golaha Wakiilada** waa inagu ceeb in Golaha dhami aanu lahay wixii uu isku nidaamin lahaa ama xeer-hoosaadba waana in aan marka hore inagu is nidaamino marka danbe aan u gudubno xeerar kale e

- **Xeerka Nidamka Xukumada,** xeerkaasi waynu dhamays tirnay waana laga dooday gudina waa loo saaray xeerkaasi waxaa uu u yaalaa codayn e isna ha loo codeeyo.

- **Xeerka Baanka Ganacsiga**, xeerkaa baanka culumo ayaynu u dirnay oo shareecada ha la waafajiyo ayaynu nidhi oo shir-gudoonka ayaa loo xilsaaray ee dibada ha lagu soo dhameeyo oo halaga saaro ajandaha waayo isaga oo ribo ku jirto la ansixin maayo.

- **Xeerka Caasimada,** xeerkaa waxaan leeyahay meesha halaga saaro oo gudiyo haloo saaro waayo waa xeer aad u balaadhan oo waxaa xataa saamayn ku yeelanay xeerkan doorashooyinka Golaha wakiilada waana in caasimadu noqotaa meel umada oo dhami leedahay cdi walbaana iska sharixi karto.

- **Xeerka Kufsiga iyo Xadgudbayada Jinsiga** xeerkaana meesha ha laga saaro ayaan leeyahay meesha waayo shareeco la isku maamulo ayaynu leenahay oo hadaba shaqaysa.

- **Xeerka Miisaaniyada (**xeerkaa aad ayaan u soo dhawaynayaa qodobada kal-fadhigan aan ka doodayno halagu daro ayaan soo jeedinayaa

Waxaa kale oo aan woxogaa ku noqonayaa xeerka doorashooyinka Golaha Baarlamaanku waa isku mid oo malaha laba xeer oo kala duwan siyaabaha loo dooranayaana Dastuurka ayay ku yaalan inaga waxaa la inaga rabaa sidii aan u samayn lahayn xeer labadaba lagu doorto, waxaanan aad u soo dhawaynayaa in dastuurkana la furo waana arinka kaliya ee xal u noqon kara in umadu yeelato xeer rasmiya waanad mahadsantihiin.

**17. Md. Aadan X. Diiriye Dirir:-** (6min 2sec) Dhamaantiin waad salaamantihiin marka hore waxaan soo jeedinayaa in wixii la isku eedaynayay marka dibada la joogo in aan Golaha lakeenin oo waa in ay inoo kala soocnaadaan, mana aha in xildhibaaanka ka doodanayaa in aanu shirgudoonka ama mid ka mid ah uu gooni ula boxo oo uu si gooniya ula yimaado ama Xukuumada si gooniya wax u yidhaa, waana in aan wixii aan xaq aan u leenahay ka doodnaa.

Hadii aan u soo noqdo Ajandaha Qodobka 1aad Wax-kabadedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Golaha Wakiilada, marka hore waa in aan iswaydiinaa xeerkan, ayaa sameeyay xageese uu ka yimid, yaa amsixiyay marka intaa aan isla helno ayay doodiisu imanaysaa ayaan qabaa, waayo halkan waxaa inala fadhiya golihii hore ee ansixiyay xeerkan ama shirgudoon kiisii.

Markaa xeerkana kumuu iman sidan aan maanta uga doodayno ee waxaa uu ku yimid wada xaajood ka dhexeeya Golihii Wakiiladda, Golihii Guurtida iyo Golihii Xukuumada ee wakhtigaa jiray.

Waxaanan qabaa in wixii aan xeer ansixinay ay si xalaal ah oo loogu dhaqmo ay u soo bexeen, markaa waxaan leeyahay xeerkaa doorashooyinka Golaha wakiilada haduu Golaha imanayo oo la rabo in laga dooda waa in la soo raaciyaa oo aanu kaligii la keenin xeerarka kala ah xeerkii doorasha madaxweynahay iyo ku xigeenkiisa, xeerkii deegaanka, xeerkii diwaan galinta, xeerkii jinsiyada, xeerka gobolada iyo degmooyinka waayo in xeerkan oo kaliya doorasho lagu galo maaha.

Qodobada kale waxaan soo horaysiin lahaa

- **Xeerka Kufsiga iyo Xadgudbayada Jinsiga** in loogu horaysiiyo waayo waa aafo dabiiciya oo ka jirta wadankeena
- **Xeerka Waxbarashada.)**
- **Xeerka Wadooyinka.**
- **Xeerka Nidaamka Xukuumada**
- **Xeerka Ganacsiga Baananka**
- **Xeerka Miisaaniyada**

Waxaan leeyahay hadii intaa aan qabano umada ayaaba inoo ducayn waanan ka baxa waad mahadsantihiin.

18. **Md. Maxamed Cismaan Maxamed (Bulqaas):-** (5min 51sec) Dhamaaan mudanayaasha iyo shirgudoonka iyo saxaafadaba waan salaamayaa waan salaamayaa waxaan is dultaagi lahaa ajandahaha waxaanan u soo kala horaysiinayaa:-
    - Xeer-hoosaadka Golaha wakiilada
    - Wax-kabadedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Golaha Wakiilada
    - Xeerka Wadooyinka ee Somaliland Road Auiltority

    Waxaanan soo jeedinayaa in dhamaan meesha laga saaro kuwa kale oo dhan waayo xeerka kufsiga iyo tacadiyada jinsiga waxaan ka mid ahay Gudidda cadaalada oo wali nagamuu soo bixin wali mana garanayo meesha laga keenay.

    Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa oo aan leeyahey Ajandaha ha lagu soo daro:-

    - **In Dastuurka lafuro** oo goboladuna sida ay u kala baaxad balaadhan yihiin ha loo kala siiyo wanad mahadsantihiin waanan ka baxay.

19. **Md. Siciid Warsame Ismaaciil:-** (3min 45sec) Shir-gudoonka xildhibaanada iyo saxaafadaba aad ayaan u salaamayaa marka aan ajandaha eego waxaa uu u egyahay mid soo koobaya baahiyaha xeerar ee maanta jooga waxaanan aad u taageersanahay in xog-ogaal unoqoshada dalku ay tahay mid aad u mihiima waayo waxaa jira in siyaasada arimaha dibada iyo arimaha guduhuba u baahan yihiin in wax laga qabto waayo waxaad arkaysaa in maalinwalba shacabka la laynayo waxaanan qabaa in loo soo kala horaysiiyo:-

    - Xog-ogaal unoqoshada xaalada dalka
    - Xeerka doorashada Golaha wakiilada
    - Xeerka miisaaniyada
    - Xeerka nidaamka xukuumada
    - Xeerka waxbarashada
    - Xeerka kaganacsiga baananka
    - Xeer-hoosaadka Golaha wakiilada

    Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa oo aan ku soo dari lahaa:-

    - **Xeerka Hantida Qaranka,** waayo waa xeer aad u mihiim ah waxaanan maalin walba aragnaa hantida qaranka oo la iibinayo waana kii xakamayn lahaa dhibaatadaa taagan
    - **Xeerka Golaha Guurtida** iyo
    - In loo yeedho **Wasiirka Ariamaha Gudaha** si wax looga waydiiyo dhibaatooyinka dhacayay ee aan maqlaynay maalmahan danbe.

**20. Md. Maxamed Axmed Maxmed (Dhakool):-** (7min 6sec) Shirgudoonka iyo mudanayaashaba waan salaamayaa salaam ka bacdi mudane Gudoomiye Ajandaha waxaa ku qoran 11 Xeer, markaa 7xeer sida la isku hor iyo daba marinayo waxay u bahan yihiin in ay noqdaan 7 xeer oo ka mid noqda Ajandaha waxaanay kala yihiin:-

- Xeernidaamiyaha Xukuunada
- Xeerka wax barasha
- Xeerka Somaliland Road Auiltority
- Xeerka miisaaniyada
- Xeer-hoosaadaka Golaha wakiilada
- Xeerka saxaafada
- Xeerka caasimada

7daa waxaan qabaa inay ku haboon yihiin in ay kalfadhigan ka qayb qaataan 4farta kale ee xeer waxaan is dul taagayaa laba xeer oo ka mid ah oo aan qabo in aanay qaran ahaan iyo umad ahaanba faa'iido u lahayn oo ah:-

- **Xeerka kufsiga iyo tacadiyada kufsiga,** (magaranayo xeerkaa wax meesha loogu soo daray waayo dad dhaqan, diin iyo xukuumad leh ayaynu nahay waxaa kale oo aan leenahay garsoor oo hadii wax la kufsado waxaan leenahay nidaam loo maro markaa waxaan soo jeedinayaa in xeerkaa meesha laga saaro oo aanu mudnayn in Golaha lakeeno.

- **Xeerka Argagixisada** (xeerkaana meesha halaga saaro waayo argagixiso malin ee meesha halaga saaro mana mudna in meesha la keeno oo laga dodo.

**Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa**:-

- **In Xeerka Doorashada Golaha,** loo dhiibo si ay Gudida Arimaha Guduhu uga daba tagaan.
- **In Dastuurka lafuro,** waxaan kale oo aan aad u taageersanahay in Dastuurka lafuro oo aan ku taageerayaa xildhibaanada soo jeediyay waanad mahadsantihiin waanan ka baxay.

**Gudoomiyaha:-** waxaan Mudanayaasha ka codsanayaa in la dhageysto Mudanaha hadlaya oo la is ixtiraamo, sanqadha iyo socodka ha la yareeyo.

**21. Md. Siciid Cilmi Rooble:-** (6min 54sec) Bacda salaam, horta anigu Ajandaha la soo sameeyey guud ahaan sidiisa ayaan u taageersanahay, laba qodob uunbaan ka hadlayaa:-

- **Xeerkii Doorashada Guurtida** waa loo baahan yahay inagaanu waajibaadkeena ka mid yahay inagu 10 baynu maraynaaye iyagu 30 bay marayaan, waxay umadu inaga sugaysana weeye oo waa waajibaadkeena.

- **Xeerka Doorashada Golaha Wakiiladu** waxaa weeye qofka marka masuuliyad lasaaro haduu qofku calooshiisa ku dabaqo if iyo aakhiraba waa dambaabay. anigu waxaan leeyahay bahalkaa aynu hore isku dhaafino waa laynaga sugayaaye, waana waajib ee iinkaarbaa inagaga dhacaysee kaas aynu sii daynoo qolada reer boorama ee cabanaysa berberaa ka daranoo, hadaynu cabasho bilowno ee yaan la inagu furin cabasho ee ta dambe aynu u daynoo tan sidaa aynu isku dhaafino.
- **Xeerka Kufsiga** anigu guddidii cadaaladaan ahoo 6 gobolba waanu soo marnay gobol walba kufsi waa ka dhacay, umada xeer haloo sameeyo ileyn kitaabkii kuma dhaqanoo dastuur baynu samaynaysayay ileyne.

- **Xeerka Hantida Qaranka** ayaan ku soo darayaa, sababtu waxaa weeye dastuurkeenu wuxuu sheegayaa dawladu way iibin kartaa hantida waanay kirayn kartaa, inoomana qorna nidaamkii ay ku iibin lahayd ama ay ku kirayn lahayd siduu dastuurku sheegaayo, haday dawlad kastaaba tidhaahdo aniga waxaa i siiyay dastuurka oo ay dawlad walbaaba xaraashto qarankuna ka faaidi waayo waa masiibo inagaanay masuuliyadeena tahay waxaan soo jeedinayaa in xeerkaana lagu daro.

**22. Md. Cali Maxamed Xasan:-** (6min 43sec) Salaan ka dib, Ajandahan xeerar buu u badan yahay waana muhiimoo waa wuxuu Golahani u jiro, markaa waxaa anigu soo jeedin lahaa inaynu kal-fadhigan shaqo badan qabano xeerarkana ansixino, mid horta waan saxayaayoo Xeerkan Kufsiga iyo Xadgudubyada Jinsiga ah, xadgudubyada jinsiga ah maaha in macneheeda la khaldo Golahana yaan loo fasirin sidii dad dhaqan xun ka doodaya oo umad baa ina dhagaysanaysa umadeeduna waa umad muslima 100% xadgudub yada jinsiga ah waa la yaqaan waana wixii faro xumayn iyo kufsiga ku saabsan jinsigana waa la yaqaanaa marna lab iyo dhadig buu noqdaa marna marka laakiin halkan looga jeedo waxaa looga jeedaa faro xumaynta iyo kufsiga, markaa wax dhaqan xun maaha in laga doodo dadkana looga digo xeerna laga soo saaro oo la ciqaabo.

Wax Kabadalka Iyo Kaabista Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada, aniguu waxaan odhan lahaa Golahani wuxuu fadhiyay 10 sano xeerkana waxaa la ansixiyay 10 sano iyo badh ka hor intaana goleheenu wuu shaqaynayay runtii dhaliil baynu ku leenahay inaanu xeerkaas wali inaga soo bixin waliba 2 jeer laynoo kordhiyay oo tii sadexaad aynu maanta ku shaqaynayno oo aanu xeerkii wali jirin waa dhaliil kale. markaa waxaan odhan lahaa xildhibaanadan qodobka ah saami qaysbigu markii horena aadbaa looga dooday xisbiyada, golayaasha, stake holderska, halkaa imika uu yaalo ayaa la dhigay ee aynu ku fadhino oo ku meel gaadhbuu ahaa markaana goboladu way ka cabanayeen mar hadii goboladu cabanayaana in tirada la badiyaabay noqonaysaayo dastuur furis bay u baahanaysaa iyo hadii la idhaahdo tan imika halagu saleeyana tirokoob bay noqonaysaayo labadaasna lagama baxayo oo mudo ayay qaadanaysaa doorashana dhici mayso dalkuna doorashuu sugayaa.

Xildhibaanada waxaan u sheegayaa marka xumada doorashadu kacdo cid joojin karaysaa ma

jirtee dadka haynago soo jeedininee inagana 5 sanadoodbaa laynoo kordhiyay 10 sano baynu fadhinay kordhin kalena wali waynu ku fadhinaa xeerkiina diyaar maaha markaas waxaan odhan lahaa xeerkaas haynaga baxo kal-fadhigan, wixii ku saabsan sixitaankiisa Guddidda Arimaha Gudaha ayaa soo sixi markaa waxaan qabaa hada ajandaha la joogaaye aynu ku darno golahana sidaa haka gudbo.

23. **Md. Xuseen Ismaaciil:-** (1min 9sec) Waxaan leeyahey ajanduhu sida uu dhigan yahay sidiisa ayaan ku raacsanahey, waxaana aad iyo aad u taageerayaa in ajandaha:-

- **Xeerka Hantida Qaranka** lagu soo daro.
- **Xeerka Doorashada Guurtida** lagu soo daro.
- **Wax ka badalka Xeer-hoosaadka** lagu soo daro.
- **Xeerka Ganacsiga Baananka** ha lagu soo daro waa Xeerka dalku u dhimanayee, markaa Xeer ha laxalaaleeyo oo number 2 ha laga dhigo waanu inagu raftay dadkuna waa u baahan yahay.

**Point of Correction, C/qaadir Jirde:-** Xildhibaan Aadan baa soo qaaday xeerka Doorashada Golaha Wakiiladu siduu ku yimi saami qaybsiga iyo doodihii laga galay, markaa waxaa jira report weyn oo anu qornay barigii oo ku jira buugii uu qoray garyaqaan Ibraahin Xaashi Jaamac oo uu u bixiyey Jirde Report oo kasoo bilaabmaya 1956 ilaa maanta. Markaa waxaan soo jeedin lahaa maadaama Goluhu hayo marka la gaadho xeerkaa doodiisa in loo qaybiyo golaha.

24. **Marwo. Baar Siciid Faarax:-** (5min 26sec) Ajandahan waan soo dhaweynayaa siduu u dhan yahay arimaha ku qoran, markaan soo qaado qodobka u horeeya:-

- **Wax Ka Badalka iyo Kaabista Xeerka Golaha Wakiilada**, xeerkaas waxaan u malaynayaa in badanbaa golaha wakiilada lagu eedeeyey in badana waa laga sugayay inaguna xukuumadaynu ka sugaynay maadaama xukuumadii keeni wayday in inagu maanta ajandaha kusoo darsanay, waxaan qabaa xeer jira weeye laakiin laba qodob uunbaa is badalaya, labadaa qodob iyo wixii is badalaya halaga badalo.

- **Arrintata Saami Qaybsiga,** waxaan qabaa iima muuqato in maanta la sixi karo wakhti dheerna waa qaadanaysaa.

- **Xeerka kufsiga,** ayaan u gudbayaa dhibaatada ka jirta maanta awal kufsigu wuxuu ahaa nin iyo gabadh meel iska hela waliba miiguu ka dhici jiray imika kufsi wadareedbaa dhaca waxaad markhaati ka wada tihiin oo hargeisa ka dhacay hablo masaajid kasoo baxay rabadaana ay ahayd inay oo ilaa 10 dhalinyaro ahi kufsatay, jinsiga anuu waxaan u qaadanayaa waa rag iyo dumar waxaan soo jeediniyaa in xeerkaa kufsiga la ansixiyo.

- **Xeerka Waxbarashada Qaranka,** waan soo dhoweynayaa, xalay Tvgaan daawadoo waxaan arkayay muran badan oo ka jira waliba kuwa private ka ah oo dawladu ku amartay markii caruurtii 2 bilood iyo siyaado fasax ahaayeen, caruurihiina dhibaatada dadka ka haysata waad ogtihiin waxaan leeyahay isagana waa in degdeg u ansixinaa.

- **Xeerka Miisaaniyada,** waa wixii dalku ku kala soconayay waxaan leeyahay inkastoona doodii miisaaniyadu aanay wali bilaabin in miisaaniyada sanadkan Gobolo lagu saleeyaa oo Gobolada qaybina waa xaab xaabso qaybina waa magaca uun bay ka maqlaan markaa waxaan leeyahay cadaalada halagu dhawaado miisaaniyadana halagu saleeyo Gobolada.

25. **Md. Axmed Maxamed Diiriye (Nacnac):-** (2min 2sec) Waan salaamayaa Shir-gudoonka iyo mudanayaasha, Mudane Gudoomiye dadku dooroshooyin bay inaga sugayaan, anigu waxaan odhan lahaa:-

- **Wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Dooroshooyinka Golaha Wakiilada yo Guurtidaba,** waa inaynu usoo horaysiino oo ay dadku arkaan inaynu doonayno in layna doorto gacanteenay ku jirtaaye aynu shaqayno labadaa bilood.
- **Xeerka Ganacsiga Baananka** ayaan ku xigsiinayaa oo marwalba inagu soo noqda dadkuna ay inaga sugayaan,
- **Xeer-Hoosaadka Golaha** isagana inaynu keeno oo ku darno.
- **Xeerka Saxaafada** isagana in badan buu inagu soo noqnoqonayee inaynu keeno.

26. **Md. Maxamed Maxamuud Cumar Xaashi:-** (1min 46sec) Waxaa aad moodaa Gudoomiye inta is daba taal ee xeerar ah oo qaarna Golweynaha ay ku qoran tahey, qaarna Guddi, inta Goleweynaha oo aan anigu u qabo in qaar badani soo noq noqdeen Xeerka Ka Ganacsiga Baanka, Xeerka Miisaaniyada oo iska dhamaa, Xeerka Caasimada intaasiba waa iska diyaar oo waa wax dhan waxaan qabaa intaasiba waa iska diyaaree in xaga hore lasoo mariyo.

Ka doorashada ee laga hadlayo sida xildhibaan Axmed sheegay waa in kii Guurtida lagu soo daraa oo labada aynu is barbar dhignaa si ay u noqdaan wax waara hadii aynu nidhaahno maantaynu ka talinaynaa barina loo baahdo xeer kale waa mushkilad, waanad mahadsan tihiin.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ------------------------------------------------ | ---------------------------------------- |